# Garaadso Intaadan Guursan

**Waxaa Qoray:**

Mubarak Mahamud Saleban

(Mubarak Hadi)

Waxaa hubaal ah, gabadh iyo wiil kastoo guurdoon ah, oo maantadunida guudkeeda jooga inuu ku haminayo siduu ku heli lahaa ama ku hanan lahaa qof wanaagsan oo ay nolosha wada qaybsadaan.

Waxaa hubaal ah haddaad tahay guurdoon, in aad dooneyso qof aad nolosha macaankeeda isla qeybsataan,qof aad mugdiyada nolosha aadamaha soo foodsaara iska weheshataan, qof aad isku noqotaan muraayad oo midba midka kale isku daawado, qof uu Eebbe idin kala siiyo awlaad aad ku indho qabowsataan, qof aad nolosha inta idiinka dhiman iska soo ag toostaan, iyo weliba qaar kaloo badan oo aanan qoraal kaga soo gayoon karin.

Run ahaantii, waa nolol dhan oo aan qoraal lagu soo koobi karin. Hadaba waxaa is weydiin mudan, sidee lagu helaa qof wanaagsan? Inta aanan idiin far fiiqin qofka wanaagsan sida lagu helo ama dadka lagaga garto, aan ku weydiiyo su’aal. Guurdoonyahow dhowrsani maxaad ku dooran lahayd gacalka aad dooneysid xitaa hadduu Rabbi idin gaarsiiyo 100 sano inaad iska soo ag toostaan?

Waa su’aal da’weyn oo dadka guurdoonka ah qaar badan oo ka mid ihi jawaabteeda saxda ah ay hareer maraan. Waa arrin inta badan qofka guurdoonka ah ay ka qariyaan wax yaabo kale oo dhalanteed ah. Waa su’aal u

baahan in uu qofka guurdoonka ah, waxbadan ka fiirsado jawaabteeda; islamarkaana uu isku dayo in ay bal jawaabtiisu tahay mid guul u horseedi karta.

Maanta waxaan joognaa wakhti ay noloshii isbeddashay, wakhti ay dadkii isku ekaadeen, oo qofka xun iyo kan fiican ay adagtahay inaad kala garatid, wakhti is aaminiddii ay yaraatay. Hadduu Rabbi idmo waxaan qormadaydan kaga jawaabi doonaa su'aalo dhowr ah, oo ay ka mid yihiin:

***1.*** Maxaa la'iiga baahanyahay inaan noqdo inta aanan raadin qof wanaagsan?
***2.*** Sideen u doortaa gabadh wanaagsan, maxaanse ku doortaa?
***3.*** Waa maxay calaamadaha lagu garto gabadha wanaagsan?
… iyo weliba talooyin badan, oo ku aaddan sidaad u abuuri lahayd geed hadh weyn oo islamarkaana miraha kaaga baxaa ay yihiin kuwo macaan.

Qormadan, oo hadduu Rabbi idmo taxane noqon doonta, qeybaheeda horana aan wiilasha kula hadli doono ayaa waxaan u hibeeyey dhallinta Soomaaliyeed ee guurdoonka ah iyo wiliba qof kastoo jecel inuu yagleelo (dhiso)guri iyo sowjad (Xaas) sabab u noqota inuu ku naaloodo(raaxaysto) nolol ey farxad, xasillooni , deganaan iyo jaceyl ku dheehanyihiin . Waxaa la yiraahdaa,

"ما ذاق طعم العيش من لم يكن له حبيب يطمئن اليه ويسكن"

*''Nolosha macaankeeda muusan dhadhamin qofkii aan laheyn xaas uu ku xasilo oo uu ku dego,''*

## 1. MARKA HORE INTA AADAN RAADIN QOF WANAAGSAN, ADIGU NOQO MID DHOWRSAN?

Isku day inaad noqoto qof dhowrsoon marka hore, qof Alle ka baqa, qof ku xiran diinta Alle. Haku mashquulin inaad raadiso qof wanaagsan adoon taada marka

hore wanaajin. Marka hore wiilyahow noqo Maxammed dhowrsoon waxaad heleysaa Khadiijo dhowrsoone.

Qofkii wanaagsan wuxuu helaa qof wanaagsan, qofka xunna wuxuu helaa qof xun. Sidaa daraadeed naftaada wanaaji Eebena ma dayici doono dedaalkaaga, oo wuxuu kuu sahlayaa qof dhowrsoon oo aad adduunyada raaxo kuwada noolaataan.

## 2. SIDEEN U DOORTAA GABADH WANAAGSAN MAXAANSE KU DOORTAA?

**Gabar dhawr tilmaamood ayaa sababa guurkeede:**

Midbaa quruxda loo guursadaa laguna goobtaaye

Midna magaca qooskey gashey guur ku mudataaye

Midna gunudda ey heysatuu kaa galaa damace

Midna waxaa gayaankaa ka dhiga garasho diimeede

Geelow (magaca qofka lala hadlayo) si gaara u ogaw tan u gadaaleysa”

Tuducyadan gabayga ah ee aan kor ku xusay, waxey tilmaamayaan ama micnaynayaan xadiiskii nabiga (csw) uu kula dardaarmayey dhallinta guurdoonka ah. Waxey tilmaameysaa inuu wiilku ahmiyaddiisa 1aad ka dhigo siduu u heli lahaa gabadh diin leh.

***Quruxda:*** Quruxdu waa wax aan waligeed taagnaaneynin, oo waa wax tagaya. Waxaa kaloo la yiraahdaa quruxdu dhalaalka kore ma’aha ee waa midda qalbiga gabadha uu alle ku abuuray (Dhaqan wanaageeda, dabeecad wanaageeda, xaqdhowrkeeda, dhago nugeylkeeda (iwm).

***Maalka:*** Maalku waa wax la heli karo lana waayi karo "abaar iyo barwaaqaa is xiga *laba ayaamoode, alllaylkiina waxaan joogin baa iman dharaartiiye''.*

***Nasabka:*** waxaa laga yabaa gabadhaad nasabka ku guursatay, in la helo mid kaloo kasii nasab iyo mansab wanaagsan, laakiin waxa kaliya ee haraya)ee aan dhammaaneynin waa qodobkan soo socda ee meel ku gunud.

***Diin ku dooro:*** Gabadha diinta lihi waa tan garanaysa siday u gudan lahayd xaqa uu ninkeedu ku leeyahay, siday u dhawri lahayd asraarta gurigeeda iyo nafteeda, carruurtana ugu barbaarin lahayd tubta toosan. Run ahaantii nin nasiib leh ayaa hela gabadh diin leh. Gabadha diinta leh waa furaha nolosha. Waa qof adduunyadaada iyo aakhiradaadaba kuugu kaalmeyneysa wanaaga.

Lammaanahaaga ha ku qiimeyn qurux keliya, ha ku xulan xoolo keliya, ha ku raacin reer keliya, ee ku dooro diin. Hadduu Ilaahay ku siiyo gabadh diinna leh, quruxna leh waa mahad Alle, haddii aad hesho gabadh diinna leh, xoolana leh waa mahad Alle, haddii aad hesho gabadh diinna leh, reer magac lehna ka dhalatay waa mahad Alle, laakiin diintu hakuu noqoto shuruudahaaga midda ugu horreysa ee aad wax ku doorato.

Kedibna wuxuu Ilaahay kuu raaciyo diin wanaageeda oo nasab, maal, iyo qurux ahna, ay kuu tahay nimco dheeraad ah. Gabadh diin leh marka hore raadi, iyadaa laga helaa nolosha raaxadeeda. Xadiis uu Abdullaahi ibn Cumar Ibn Caas warinayo buu nabiga (csw) ku leeyahay;

"الدنيا متاع وخير متاعها المرأة الصالحة"

''Adduunyadu waa dhaldhalaal iyo raaxeysi yar, dhaldhlaalka iyo raaxaysigaa yarna waxaa ugu kheyr badan haweeney saalixad ah oo wanaagsan.''

**Shaacirkii wiilka guurdoonka ah la talinayayna waa tuu lahaa;**

“Haddaad dooni guri raaxaloo aan dhib kugu gaarin
Iyo guur wanaagiisa iyo gogol macaankeeda
Iyo gibil asturan oon rag kale gaarin aragiisu
Iyo hadalka oo gaabanoon dariska gaareynin
Iyo guud wixii aad fartaba gabar addeeceysa
Oon dibadda gaareyninoo joogi gurigeeda
Oo goorti aad fiirisaba garan muraadkaaga
oo gacan ku siinee haddii dhibi ku soo gaaro
Oo guulahey kaaga barin in uu ku guuleeyo
Oo goor walbaba raali ku ah guulle wuxuu keeno
Oo aan ganbiyo kala jecleyn gini midkaad siiso
Oon biilkii wuu go’ay laheyn amase wuu gaabtay
Oo guriga gole diin ka dhigi gebi ahaantiisa
Ku gardaadin guud ubadka oo diinta garansiini
Geellow waxaa laga helaa gabar taqaan diine
Kala garo wixii kugu gafiyo wixii gudboonkaa ah;

**AKHLAAQ IYO DHAQAN WANAAG KU DOORO:**

Waxaan joognaa xilli dhaqankii wanaagsanaa uu sii gabaabsi yahay, xili akhlaaqdii suubaneyd ay god madow

kusii aroorayso, xilli xishoodkii iyo xayadii lakala dhaqaaqay. Waa lagama maarmaan inaad akhlaaqda iyo dhaqankeeda ka eegto gabadhaad guursaneyso. Umaduhu waxay ku dhisanyihiin akhlaaq iyo qiyam, haddey

akhlaaq iyo beelaan qiyam way burburaan, Xadiis uu warinayo Abu Saciid Al Khudriy oo uu ka warinayo Nabigu CSW wuxuu inoo tilmaamayaa;

"أكمل المؤمنين إيمانًا أحسنهم أخلاقًا"

''Dadka Mu'miniinta ah waxaa ugu iimaan dhameystiran, kooda ugu akhlaaqda wanaagsan.''

**Mar kale wuxuu nabigu leeyahay (csw):**

"إِنَّ النَّاسَ لَمْ يُعْطَوْا شَيْئًا خَيْرًا مِنْ خُلُقٍ حَسَنٍ"

''Dadka lama siin oo looma hibeyn wax ka wanaagsan oo ka kheyr badan akhlaaqda wanaagsan.''

Haddaad dooneyso gabar kheyr badan oo aad ku indho qabowsato, akhlaaq wanaag ku dooro. Haddey gabari akhlaaq beesho yeysan gurigaaga soo gelin.

## DABEECAD WANAAG KU DOORO:

Dabeecaddu waa muhiim. Waa muhiim ineey labada qofi isku dabeecad yihiin, dad is fahmaya oo nolosha isku si u arkaya yihiin. Dabeecaddu waa qeyb ka mid ah is fahanka, labada qof. Haddey labada qof is dabeecad fahmaan waxaa hubaal ah ineey nolosha inteeda kalena isku fahmayaan, haddiise labada qof dad is dabeecad fahmaya eysan aheyn waxaa hubaal ah inuu gurigaa ku dambeynayo burbur iyo kala haad.

## 3. WAA MAXAY CALAAMADAHA LAGU GARTO GABADHA WANAAGSAN?

* Waxaa laga helaa inta badan masaajidda, maraakista diinta lagu barto iyo guri diinta Alle saldhig uu u tahay

* Waxaa lagu gartaa gabdhaha ay saaxiibada yihiin had iyo jeer oo ah kuwa diin leh

* Waxaa lagu gartaa oo astaan u ah in ay had iyo jeer xijaabkii Alle ku waajibyeelay xirantahay.

* Waxaa lagu gartaa xishoodka joogtada ah. Waa gabar had iyo jeer xishood dheeraad ah aad wajigeeda, socodkeeda iyo hadalkeeda ka dheehaneysid

* Waxaa lagu gartaa qoyska ay ka soo jeeddo dhaqan wanaagiisa. Haddey hooyadeed iyo aabbeheedba yihiin dad aan bulshada magac iyo sumcad sare ku laheyn oo aan bulshada wax qiima ah ku lahayn, waxey u badantahay ineey gabadhoodana wanaag badneeyn, sababtoo ah inta badan dhaqanka waa la iskaga daydaa.

* Waxaa lagu gartaa markaad haasaaweysaan ineysan ahayn mid hadal kugu dardarta oo afka ku goosata (Waa hadaadan xumaan kula hadlin)

* Waxaa sidoo kale lagu gartaa markaad haasaaweysaan ineey tahay gabadh had iyo jeer wixii Rabbi xadeeyay ee sharci ah, aan ku xadgudbin adna aan kaa ogalaan inaad ku xad gudubtid.

* Waxey caro awgeed isdaba martaa markaad kala hadasho wuxuu san Ilaah SWT Raalli ka aheyn

* Waxey kaala sheeykeysataa mustaqbal iyo sidii aad u yagleeli lahaydeen guri Illahay raali ka yahay.

* Waxeey tix galisaa ehelkaaga iyo qaraabadaadaba.

* Waxey ka ag fogaataa oo ku xajiimootaa dumarka caariyaadka ah. (Ineey dacwo iyo diin u gudbineyso mooyaane)

* Kuguma xirto inaad u dhigto aroos qaaliya, gawaari badan oo lagu galbiyo, qasri qaaliyoo la dejiyo iwm

* Haddey gaajeysantahay iyo haddey dharagsantahayba cabasho kama maqleysid, oo waa gabar ku qanacsan wuxuu Alle siiyay. Waa gabar uu Rabbi qanaaco siiyay. Gabayaagii xakiimka ahaa wuxuu yiri;

**“faqrigu sidiisaba,**
**sacab madhan ka xeel-dheer,**
**qanacood ka sooftaa,**
**ugu daran saboolnimo”**

* Waxaa hadalkeeda, muuqeeda, socodkeeda, dharkeeda, asxaabteeda, meelaha ey joogta had iyo jeer laga dheehdaa, laga dareemaa muuqaal uu Rabbi raali ka yahay.

Iyo wiliba qaar kaloo badan oo uu wiilka dhowrsani maskaxdiisa dhowrsan ka dhex heli karo.

## 4. TALOOYIN GOOS-GOOS AH OO U GAAR AH WIILKA GUURDOONKA AH

* Garaadso intaadan guursan, u diyaar garow noloshaad dooneyso inaad abuurto.

* Ha guursan hadaadan u heyn aqal iyo qalbi aad dajiso walaashaa

* Iska fiiri qoyska ay gabadha ka dhalatay, hooyadeed, aabbeheed, walaaleheed iyo wiliba saaxiibadeedba, sababtoo ah dadku waxeey isku yeeshaan saameyn aad u ballaadhan.

* Haddaad dooneyso guur xalaal ah, shukaansigaaga u mar waddo xalaal ah.

* Ogow ninkasta wuu awoodaa inuu xaas guursado oo caruur dhalo, laakiin nin kasta ma awoodo inuu xaaskaas iyo caruurtaas mas'uuliyadooda qaado

* Haku dheeraan mudada aad gabadha wada sheekeysanysaan. Inta badan waxaa dhacda in muddo intii la wada sheekeysto, oo xiisuhu dhammaado, kadibna la kala dhaqaaqo.

* Haddaad rabtid inaad waddamada reer galbeedka ku dhex guursatid, guurso gabar ay u joogaan hooyo, aabbe iyo wiilal la dhashay, kuwaasoo bulshada dhexdeeda ka maamuusan, ku leh magac iyo mansabba. Sababtoo ah dhulkaad joogtid waa dhul dhib badan, waa dhul dumarka awood loo siiyay sidii iney iyagu ninka furi karaan oo kale, taas oo sababtay shacbiyadda reer galbeedka, furriinku inuu ka marayo 60% (Boolkiiba lixdan).

Nasiib xumo waxaa dhacday dumarkii muslimaadka ahaa markey dhulalka reer galbeedka yimaadeen iney iyaguna is bedalaan, oo dhaqankaa ku qancaan qayb yar, oo Ilaahay u naxariistay mooyaane. Sidaa daraadeed waa gaashaan inaad guursatid gabadh hooyadeed, aabbaheed iyo walaalkeed oo weliba bulshada sumcad ku leh, inaad guursatid.

* Gabadha aad guursaneysid iyo adiga dhexdiina ku abuur geed hadh weyn oo kalsooni la yiraahdo.

**Aas aaska guurkiyo**

**Aqal waxa adkeeyoo**

**Udubada u taagaa**

**Ogow waa kalsoonida**

**Iyo unugga caashaqa**

* Haka welwelin waxaad siin lahayd iyo waxaad ku dhisan laheyd reerka marba haddaad tahay qof raba inuu dhameystiro qeyb diintiisa ka mid ah, waayo Rabbi baa kaa kafaalo qaaday. Xadiith Abaa Hureyra (RA) uu warinayo oo xassan ah buu nabigu (SAW) ku leeyahay ;

“ثلاثة حق على الله عونهم: المجاهد في سبيل الله ،
والمكاتب الذي يريد الأداء ، والناكح الذي يريد العفاف ”

‘’Saddex qof wuxuu Alle dushiisa waajib isaga dhigay inuu u kaalmeeyo: Qofka Illaahay wadadiisa ku jihaadaya, Ninka adoonka ah ee raba inuu xoroobo iyo Ninka guursanaya , guurkana ka rabo inuu ku dhowrsado.’’

* Gabadhaad guursaneyso iska fiiri, ma haweenkii horee wanaagsanaa bey waddadoodii heysaa mise kuwan maanta jooga ee nolosha xaqiiqadeeda ka leexday bey jidkooda haysaa. Waxaa la yiri berigii hore, saddex baa dumarka loo guursanjiray, saddex baa beddashay, saddex baase bi’iyay.

## Saddex baa dumarka loo guursan jiray

**(Waa saddexdda aan rabo inaad lammaanahaga ku dooratid)**

***1.*** I dheh aan dhageystee, (waa xaas ku maqleysa oo ku addeeceysa oo dhego nugul)
***2.*** ii dhiib aan kuu dhigee (waa xaas hantidaada kuu dhowreysa oo biilkaad siiso wixii looga baahanyahay ma'ahee inta kale kuu dhigeysa oo kuu keydineysa)
***3.*** iyo iga dhal aan dhunkadee. (Waa xaas u diyaar ah iney dhasho awlaad oo korsato islamarkaana ku faraxsan.)

## Waxaa beddalay saddex

*(Sadexdaana waa saddexdda aan rabo inaad kaga carartid)*
***1.*** I dheh aan dhaqaaqee (Waa haweeney aan dhegba jalaq kuu siineyn oo markaad la hadashaba irridka ka si baxeysa, haddaad wax u sheegtid iyo haddaadan wax u sheeginba ay isku mid u tahay)
***2.*** ii dhiib aan kaa dhaqdee (Waa haweeney biilkaad u dhiibtaba meel dhiganeysa, oo haddey doonto reerkaba cunta la'aan ka dhigeysa, oo waxey gacanta ku dhigtaba sanduuqa keydka (Saving account) u gaar ah dhiganaysa)
***3.*** iyo iga dhal aan kugu dhibee (Waxaan u maleynayaa middan u danbeysa in ay qurbojoogta waddamada rer galbeedka jooga ku badantahay. Waa haweeneyda markaad is yara qabataanba dharka bannaanka kuu soo dhigeysa, oo guriga kaa xiranaysa, oo caruurtaada kuu diideysa inaad aragtid. Haddaad isku daydo inaad caruurtaada soo booqatana, askarta kuugu yeereysa. Waa iga dhal aan kugu dhibee)

## Saddex baase bi'iyay

1. Dhego la'aan,

2. Dhaqasho la’aan
3. iyo Dhalmo la’aan

* Inta aadan guursan ka istakhaareyso gabadhaad rabto inaad guursato. Hadda kuma lihi adoon dedaalkaagii gudan Ilaah iska talo saaro, oo istakhaareyso, maya maya! Istakhaarada iyo talo saarashada Rabbi waxaa lala yimaadaa markaad adigu marka hore inta awoodaada ah dedaasho, oo aad la timaadid dhaq-dhaqaaqii lagaaga baahnaa.

* Ugu dambeyntii waxaan ku leeyahay gurigaaga ha ku aasaasin wax uusan Alle raalli ka aheyn, sida inaad meelo ragga iyo dumarka kuwada kulmaan oo lagu heeso kireyso. Arooskaagu waa inuu noqdaa aroos dad muslim ah leeyihiin, guri muslim ah lagu aasaasayo, la rabo in gurigaa naxariista Rabbi ay asiibto.

Si uu u noqdo gurigiinu guri aad nolol raaxo leh kuwada qaadataan inta noloshiinna ka dhiman, Eebana idin ka dhex abuuro oo idinku arsaaqo ubad aad ku indho qabowsataan.

Gayigan aynu ku noolahay gabdhaha ku nooli guud ahaan waxay soo mareen marxalado taariikheed oo mararka qaar meelka dhac ku ahaa maqaamkooda nololeed. Marxaladdii mugdiga badnayd ee casrigii jaahiliga soo ifbixii Islaamka ka hor, ayaa ka mid ahaa waqtiyadii ugu cuslaa ee lagu cadaadiyo haween.

Waxaa taariikhda ku-cad in mushrikiintii carbeed aasijireen gabdhahooda iyagoo nool, markii la weydiiyo sababta ay hablaha u aasayaan iyagoo nool ayey jawaab ka dhihi jireen waxaanu ka baqaynaa in ay ceeb noo soo jiidaan.

Laakiin Markii iftiinka Islaamku ka soo faafay carabiya, wuu beddalay caadooyinkii xunxumaa, wuxuuna reebay in la xabaal nololeeyo gabdhaha. Runtii Islaamku kor ayuu u qaaday maqaamka (darajada) hablaha.

**Waxuu yidhi Alle:**

“Ilaahay Waxaa u sugnaaday boqortooyada samooyinka iyo arla’da, kuu doono waxuu u hibeeyaa dhedig (hablo) kuu doonnana waxuu u hibeeyaa lab (wiilal)” (Suurada Shuuraa, Aayada 49)

Horumarinta aayadani ka horumarisay hablaha wiilasha waxay culimadu ku micneeyeen kor u qaadis iyo qiimeyn dheeraada oo Alle ku galadaystay gabdhaha. Guurku waa marxalad maamuus iyo sharaf u ah gabadh kasta oo guudka fidhatay. Haddaba haddii ay ku guuldarraysato gabadh qaan gaadhay inay gacanta ku dhigto wiil hanta, oo hannaankiisa diineed iyo dhaqanba wanaagsanyihiin waxay hiiftaa habnololeedkeeda, oo hadh iyo habeenba ku hamidaa inay hesho hannadkii horteeda iyo hareerteedaba istaagi lahaa, hamigana la wadaagilahaa.

Waxaa la yiri “Gashaanti haddii guudka loo dabo guri ineey lahaatiyo galbis bay u joogtaa” Hablaha qaarbaa hubsiino la’aan hafku yidhaahda guurka. Markaas ayay mustaqbalkoodii guur maanyari iyo ka-fiirsasho la’aan ku bilowdaan, dabadeedna waxay ku dambeyaan muraara-dillaac, madluun iyo guri-dumay. Dhinaca kale gabdhaha qaar ayaa qayb loo siiyay qiyaas wanaagsan iyo qumaati u gaadhidda qastiga iyo ujeedada mustaqbalkooda guur.

Waxaa la’yidhi “caqliga wanaagsani jidh-caafimaadqaba ayuu ku jiraa” Da’yarta haween ee hamigooda weyn yahay hiigsashada iyo gaadhitaanka guur xalaala waxay u talasaartaan arinkoodka Alle markaa ayay ku guulaystaan wiilkii ay waligood ku taamayeen inay hantaan.

Qadarku waa meeshiisa laakiin doorasho wanaagsan oo ku salaysan miisaamidda dhinaca diinta, akhlaaqda, iyo hab-dhaqanka ay gabadhu ku doorato wiil ayaa noqon karta mid ay ku guulaysato guur wanaagsan iyo mustaqbal la mahadiyo.

Gabdhahaas diinta wax ku doortaa waxay ku dambeeyeen nolol farxad iyo raynrayn ku dheehantahay. Nolosha adduunyo waxaa ugu muhiimsan farxad, ogow farxadda lacag laguma iibsado.

Haddaba waxaan jeclaystay inaan idinla wadaago isna yara dul-taago gabdhahan dambe oo iyagu ah kuwo gaadhay hadafka wanaagsan ee ayku beegsanayaan guurkooda, habka iyo waddada ay u maraan, iyagoo ku hamminaya inay mustaqbalkooda guur-ka dhigaan mid ifaya.

Xulashadooda hufan ayaa u muuqata mid qofkii Beegsadaa marnaba uusan ku hongoobin kuna hoogin. Dhinaca kale ku badhaadha oo barwaaqaysta geedihii ay beereen oo soo-saaray midho bislaaday oo hadana macaan.

Doorashada wiilka wanaagsan haddii la gacan togaaleeyo wuxuu noqon karaa mid waqti qaata, sidoo kale u baahan tusaalooyin iyo sharraxaad kala duwan.

Hasayeeshee horaa looyidhi “hadal nin yareeyeyna kama wada tagin kii badiyayna ma’wada odhan” haddii la soo koobana wuxuu noqon karaa Seyga (ninka xaaska ah) wanaagsani mid akhlaaq wanaagsan leh, ku dhaqma kitaabka Alle iyo sunnada nabiga (CSW) islamarkaana qaab nololeedkiisa laga dheehan karo, qawl wanaagsan, qalbi naxariista, waxa qarsoonna Allaa og.

Haddii qaabka aan u dhigay laga-yaabo qaarkiin inaad fahmiweydaan, waan kala dhigdhigayaa anigoo isla markaa qodobeynaya haddii Eebbaha awoodda lihi idmo.

Qormadan aan ugu magac daray "Garaadso Intaadan Guursan" qaybteedii 1-aad ee aan wiilasha kula hadlayay waxaan ku soo tilmaanay muhiimadda ay leedahay dhallinta guurdoonka ihi inay wax badan ka fiirsadaan, markuu rabo inuu shaqsi kale la midoobo.

Waxaa kaloon (waxaan kaloo/waxaa kaloon: tan dambe ayaa ka saxsan ustaad) soo tilmaanay in Barbaarkastaa ama gashaantikastaaba ku hammiyaan helitaanka qof wanaagsan, Laakiin ay haboontahay in-asagu billaabo dhawrsanaanta, si' uu dabadeed ula midoobo qof wanaagsan. Eebbe (SWT) quraankiisa kariimka ah wuxuu ku leeyahay,

"الخبيثات للخبيثين والخبيثون للخبيثات
والطيبات للطيبين والطيبون للطيبات "

"Kuwa xun xun ee dumarka ah waxaa leh kuwo xun xun oo rag ah, kuwa xun xun ee ragga ahna waxaa leh kuwo xun xun oo dumar ah, kuwa fiic fiican ee dumarka ah waxaa lehkuwo fiic fiican oo rag ah, kuwa fiic fiican ee ragga ahna waxaa leh kuwo fiic fiican oo dumar ah."

Haddaba, waxaa lagama maarmaan ah marka hore inaad noqotid qof isagu ku tilmaaman waxa uu doonayo. Waa hagaag qormadan oo maanta ah qaybtii 2-aad gabdhahana qaas u noqon doonta aan ku soo qaadaa-dhigno saddex arrimood.

1. Maxaa loo baahyahay inaad ku dooratid wiilkaad rabtid inaad nolosha la wadaagtid.
2. Calaamadaha iyo sifaadka lagu garto wiilka wanaagsan.
3. Dardaaran xambaarsan talooyin iyo tusaalooyin aad muhiim u ah oo aan rajeynayo inay wax badan kaa anfici doonaan.

Maxaa loo baahanyahay inaad ku dooratid wiilka aad rabtid inaad nolosha la wadaagto?

Haddaan soo koobno waxaan dhihi karaa waxaa ugu waa weyn labo arrimood. Runtii waana laba arrimood oo uu nabigu (CSW) xadiithka ku tilmaamay

“إذا أتاكم من ترضون دينه وخلقه فزوجوه”

*”Hadduu idiin yimaado mid diintiisa iyo akhlaaqdiisa aad ka raali katihiin u guuriya.”*

1. Midda ugu horraysa waa halka aynu haddaan muslimiin nahay ka duulno waana diinta. Maxaa diinta loo yiri? Diinta waxaa hoos yimaad nolosha oo dhan. Waxaa hoos yimaada gabi’ahaanba qofku siduu nolosha u’arko. Diintu waa bedbaado, qofka raacana waxay u noqotaa tusaale wanaagsan oo ay u kala saartaa wanaaga iyo xumaanta.

Qofka diinta leh waa qof Ilaah ku xiran, ilaaliya xuduuddihiisa, fartooma wixii la faray, kana hadha wixii laga reebay. Hassan al Basri oo aad wada taqaannaan oo saahid caabida ahaa ayaa nin u yimid, markaasuu ku yiri gabadhayda yaan u guuriyaa? Hassan Al basri baa ninkii ku yiri:

” زوجها ممن يتقي الله، فإنه إن أحبها أكرمها،
وإن أبغضها لم يظلمها”

”U guuri mid diin leh, Ilaahayna ka baqaya, sababtoo ah hadduu jeclaadana wuu karaamaynayaa, hadduu u carooddana ku xad gudbi maayo.”

2. Saan Kor ku xusayba ku dooro akhlaaq. Akhlaaqda waxaa hoos yimaada tilmaamaha wanaagsan gebi ahaantood. Qofka dabeecadda wanaagsani waa qof runta sheega, dabacsan, sabar baddan, dulqaad leh, naxariis leh, aan qalafsanayn, riximka xiriiriya.

Qofka dabaciisu wacanyahay inta baddan waa mas'uul, Mas'uuliyadda iyo xilka saaran ka soo bixi kara iwm. Sidaas daraadeed qofka aad dooranaysid habdhaqankiisa ogow.

## Calaamadaha iyo sifaadka lagu garto wiilka wanaagsan

Seyga-wanaagsan ee aad u baahantahay inaad dooratid calaamadihiisa haddaan si guud u qeexo, waa midka dhaqankiisu yahay sida diinteenu sheegtay, Waxaanse rabaa inaan qodob- qodob u dul istaagno qaar ka mid ah calaamadaha seyga wanaagsan.

* Wiilka wanaagsani waxaa lagu gartaa maqaamka iyo booska uu kaga jiro bulshada uu la noolyahay. Waa nin ku dayasho leh oo kaga dhex muuqda bulshaduu la noolyahay, dhaqan wanaagiisa, hogaamintiisa, u adeegidda diintiisa iyo dadkiisa.

* Waa nin wakhtigiisa qiimeeya oo jadwal ku socdo. Maaha mid habeenkii iyo maalinkii ay isku mid u yihiine waa nin qiimaha wakhtiga garanaya ugana faa'iidaysta wax kaloo qiimo badan.

* Waa nin yool leh iyo meel uu hiigsanayo. Wuxuu habeen iyo maalin u taaganyahay siduu naftiisa u hormarin lahaa.

* Wiilka wanaagsani waa daaci diinta Alle, dadka ugu yeera. Marka aan leeyahay waa daaci dadka diinta Alle ugu yeera maaha micnaheedu diintuu aqoon badan u leeyahay, waxaa dadka diinta ugu yeera waa dhaqan wanaagiisa, dharka uu xiranyahay, hab dhaqankiisa, run-sheegiisa, ballan-oofintiisa, dabeecad wanaagiisa, naxariistiisa iwm.

* Waxaa lagu gartaa wiilka wanaagsan guriga uu ka soo baxo. Guriga uu ka soo baxo waa guri diinta Alle ay saldhig u tahay oo dad akhyaar ah oo diinta Alle jecel deegaan u ah.

* Waxaa kaloo lagu gartaa asxaabtiisa ama saaxiibadiisa. Wuxuu had iyo jeer la'socdaa oo ka agdhow-yahay dad akhlaaqwanaagsan, diin leh, wakhtigooda qiimeeya. Waa muhiim inaad qofka aad dooranaysid aad iska eegtid asxaabtiisa, maxaa yeelayay.

"يعرف المرء بأقرانه"

**"Qofka waxaa lagu gartaa saaxiibkiisa."**

* Wiilka wanaagsan waxaa lagu gartaa nolol maalmeedkiisa iyo sida uu u noolyahay, haddey noqoto shaqadiisa, waxbarashadiisa, meelaha uu tago iyo qaab u dhaqankiisoo idil.

* Wiilka wanaagsan ee aad u baahantahay waa hawlkar shaqaysta oo aan dadka kale ku hoos nooleyn, aaminsan inuu xoogiisa iyo muruqiisa maalo shaqaduu doonaba ha ka shaqeeyee (Shaqooyinka xalaasha ah)

* Waa nin cibaadada Rabbi ku xiran oo Ilaaliya.  Ma aha sida gabadhii caqliga badnayd ee ragga kala dooranaysay kay ka tiri.

***"Kaan garan salaadiyo waqtiga guulle faralyeelay***
***Googoyska cibaadada gefaye geesta uga leexday***
***Oon masaajid soo gelin waqiis guur aan ka la'aado"***

*Gabay kaloo tilmaamayay sayga wanaagsan baa isna oranayay:*

***Sumad-gaar ku dhigo sadaradaydu waa tilmaan-sugane***
***Saxarlaay haddaan seyga wacan sugo tilmaantiisa***
***Sifihiisaa wanaag-lahoo marnaba maad saluugteene***
***Suuraddiisa gaarka ah haddaan saami kaasiiyo***
***Saciim weeye aan lagu aqoon Saaqid uu yahaye***
***Saalax weeye sabbixooyinkiyo loo Sakhiray sawd-qur'aanyahaye***

***Sunankiyo saxiixaynka, buu Sax u yaqaanaaye***

***Salaadaha dhamaantood ayuu wada sujuudaaye***

***Sakhibuu ilaahay ka dhigay oo sakada dhiiba***

***Sujuud-baa ku taalliyo tilmaan sugi yaqiintiisa***

***Subciskii quraankuu intaa, saddaro sheegaaye***

***Soonkiisu waa saxanyahoo malaha seegseege***

***Saligii rasuulkuu (scw) intaa sawd ku leeyahay***

***Saaxiibkii xumaada marbuu kugu safaadaaye***

***Saacaddii la joogaba qoluu saar u tumayaaye***

***Sa'da gabaygu yay ila si kane waan sagootiyaye***

***Seygii wanaagsani naftuu wada siraadaaye***

***Sifahaa ku xolo iga wallaad saatir ku xamdiyiye"***

*Talooyin iyo tusaalooyin aad muhiim u ah oo u gaara gabadha guurdoonka ah:*

Waxaa loo baahanyahay inaad ogaatid oo aad mar walba laabta ku haysid wiilka aad qalbigaaga u furaysid inuu noqon doono mid aad isla bilaabi doontaaan socdaal nololeed dheer ilaa uu mowdku idin kala geeyo.

Haddaba waa inaad maskaxda ku haysaa in doorashadaadaasi tahay imtixaan aad gasho inta aad nooshahay midka ugu adag, sidaas daraadeedna ay muhiim tahay inaad isugu gayso wax allaale wixii xeelad iyo khibrad aad leedahay si aad u ogaatid shakhsiyadiisa hoose iyo qaab nololeedka wiilka aad dooranaysid.

Waxaa kaloo muhim ah inaad kala tashatid doorashada dad ahlul xalli wal caqdi ah, dad waayeel iyo waayo arag diin lehba isugu jira.

**Ninkii jiray waatuu lahaa;**

"Haddaan weel gun laga tolin, waayaha adduunyada xog-ogaal la weydiin, ruuxii gu' kaa weyn, lagu odhan wax ii sheeg, taladaadu wiilooy, dalab waayi maysoo."

Iska Ilaali inaad noqoto mid rag badan oo ragga marba mid la shekaysata sida ay Soomaalidu tiraahdo “Naag kun bey kulmisaa kow ayeyna kala baxdaa” Waa arrin aad u dhibaato badan. Waxay keensataa ama ku bartaa wax yaalo badan oo noloshaada dambe dhib u keeni kara.

Waxay ku bartaa inaad noqotid mid been badan, Waxay keentaa in qiimihii ragga aad u haysay ay yaraato, waxay keentaa inuu wakhtigu kaa dhammaado oo aad is aragtid iyadoo cimrigaagii tagay gacantana aadan wax ku hayn, waxa kale oo ay keentaa xiisihii guurka aad u haysay oo yaraada iyo qaar kaloo badan

Haddaad doonaysid guur xalaal ah oo wanaagsan ku billow shukaansigaaga waddo xalaal ah. Inta aad wakhtiga sheekada ku jirtid iska Ilaali la kali noqodka ninka aad la shekaysanaysid. Iska ilaali iney afkaaga ka soo baxaan weedho ragga dareenkooda kiciya.

Sidoo kale waxaa dhacda ineey raggu ku yiraahdaan gabdhaha haddalo ay ku beer laxowsanayaan.

Waxaa la yiraahdaa “الرجـــــال ذئـــاب” (Raggu waa yeey)

Sidaas daraadeed noqo gabar ad adag, gabar aan la dagi karin iyadana aan wax dagin, Ha noqon qof aad daacad u ah oo shabaq kastoo loo dhigo ku dhici karta, geedaha waxaa la hor goostaa kuwooda toos-toosan dadkana waxaa noloshooda lagu ciyaaraa oo la bur-buriyaa kuwooda aadka daacadda u ah.

Noqo siduu lahaa Cumar Ibn Al Khadaab (RA):

” لست بالخب ولا الخب يخدعني“

**”Ma ihi mid dadka khiyaana mana ihi qof uu khiyaani karo mid wax khiyaana.”**

Ogow waxa ugu qiimaha badan ay gabadhi haysato waa Cifadadeeda (dhowrsanideeda), haddii ay dhowrsanidaa waydo oo ay ku ciyaartana Ilaah xagiisa iyo xaga dadkaba way ka dhacday

Ogow Jacaylku waa wax jira, laakiin jacaylku waa inuu noqdo mid Alle cabsidiisu ay u tahay hoggaan xakameeya.

Waxaa jirta arrin inta badan qof kastoo wax jeclaada ku dhacda. Waxaa dhacda in wiil aad ku hanwaynayd inaad is guursataan aad hanan waydo. Waxaan ku leeyahay marmar bay dhacdaa wax aadan jeclaysan inaad aragtid.

Waxaa la yiraahdaa,

”قد تجري الرياح بما لاتشتهي السفن“

**”Mar-mar bay dabeeshu la dhabataa waxaysan doomu jeclaysan.”**

Ha welwelin hana murugoon, waxaa laga yaabaa inuusan khayrba kuugu jirin oo uu Eebbe bedal ka wanaagsan kuu kaydinayo.

Iska Ilaali in meel cidla ah lagaa helo, intaad nin iska raacdid kadibna aad isku qancisid inaad xaas la qabo tahay iyadoon waddo sharci ah laguu soo marin. Waxaan taa ula jeedaa gabadhu ma mehersanto xaasna ma noqoto weli la’aan.

Nabigu (CSW) wuxuu xadiis ay Tirmiidi iyo Abu Da’uud soo saareen Sh Albaanina saxiixiyay ku leeyahay;

أيما امرأة نكحت بغير إذن وليها فنكاحها باطل"
"فنكاحها باطل فنكاحها باطل

”Gabadhii la meheriyo iyadoon idan laga qaadan waligeeda nikaaxeedu waa waxba kama jiraan, nikaaxeedu waa waxba kama jiraan, nikaaxeedu waa waxba kama jiraan.”

Noqo gabar lagu hantay oo loo soo maray waddo sharci ah, Sharafteeda iyo midda waalidkeedna dhowrta. Howraar abwaan hal abuur yaqaana horay gabadhiisa ugu yiri baa ahayd

“Inantii hawootee hiyigeeda guur galo

Aabbaheed haneyaa dumar ugu hagaagsan”

Ogow oo niyadda ku hay guurku waa mas’uuliyad iyo raaxo iswata lana rabo in la isku qaato.

Baro xaqqa lagugu leeyahay intaadan baran xaqqa aad ku leedahay ninka aad guursandoontid.

Ogow ninku waa madaxii reerka adiguna waxaad tahay qoortii leex-leexinaysay oo ay micnaheedu tahay adiguba mas’uuliyad baa ku saaran

Ha guursan ninka aad jeceshahay oo kaliya ee guurso nin aad is leedahay caruurtaaduu aabbe u noqon karaa.

Ugu dambeyntii waxaan ku leeyahay qofku waa labo, waxna waa wax raasamaal ma guurta ah oo uu qofku leeyahay sida shaqsiyadiisa, diintiisa, dabeecadiisa, wanaagsiisa iyo garashadiisa, waxna waa wax dhaldhalaal iyo xoogaa aduunyo ah oo qofka loogu xilanaayo.

Middan dambe ee adduunyada iyo dhaldhalaalkeeda ah way hari, inta runta ah baa soo haraysa, “Xabaal iyo ninkeeda waa loo kala tagaa markay noqoto” gawaariddii ku soo galbisay habeenka arooska way hari, hoteelkii sharraxnaa ee qaaliga ahaa wuu hari, dadkii idinla socday way hari, idinkaa isku soo haridoona.

Guri laguu camiray nin ma noqdo, dahab laguu soo gadayna nin ma noqdo, hotel qaaliya oo aroos laguugu dhigayna nin ma noqdo reerna ma dhaqo. Reer waxaa dhaqa oo nin u noqonkara nin shaqsiyad leh, xilna qaadi kara, dabeecaddii iyo kartidii uu xilkaa ku qaadi lahaana leh.

Intaa waxaan uga dan leeyahay qofkaad dooranaysid ku dooro diintiisa iyo dadnimadiisa ee haku dooran adduunyo yar. Adduunyada ninba maalin buu Rabbi siiyaa.

Gabyaagii caanka ahaa ee mufakirka ahaa Cismaan Yuusuf Keenadiid waatuu lahaa “Abaar iyo barwaaqaa is xiga labo ayaamoode, Allaylkiina waxaan joogin baa iman dharaartiiye” Imisaa arooskoodii hoteelo waaweyn lagu qabtay, qarash badanna aqal galkoodii ku baxday, maantana aan guri kuwada nooleyn oo ninba keligii meel ku dhibaataysanyahay.

Imisaa habeenkii aqal galkooda derin kuwada seexday, habeenka labaadna martida waxay siiyaan aan haysan, maantana jacayl dhexdooda ah, hanti iyo weliba owlaad ay ku indho qabowsadaan Ilaah ku arsaaqay.

Ilaah waxaan ka baryayaa inuu gabdheheenna qiimaha badan ee guurdoonka ah u sahlo guur ay ka qaadaan bash-bash, baraare iyo barwaaqo aan la soo koobi Kerin. Anigana Ilaah ha iga cafiyo wixii khalad ah ee uu qalinku iga dafay.

_________ والله يقول الحق وهو يهدى السبيل_________

## Dhammaad

Fiiro gaar ah: Wixii khalad ah ama dhaliil ah ila soo socodsii adigoo iigu soo diraya emailka hoos ku xusan.

**Email:** Mubarakhadi@gmail.com

**Xigasho:** Alyaqiin.com